# Baaritaanka Infekshinada Galmada laysugu gudbiyo (STIs) iyo Fayraska Dhiigga Ku dhasha (BBV) :

*waxaad fileyso*

**Waxay saameyn karaan qof kasta.**

Haddii galmo sameysay oo aad ka yar tahay 30, aad bedeshay wehelkaaga galmada ama haddii aad tahay qof rag ah oo u galmooday rag kale, waxaa lagu ralinayaa in lagu baaro hal mar sannadkii ama ka badan.

La hadal dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada si aad u jeegareyso sidaad si joogta ah isugu baari lahayd.

## Maxay ku lug leeyihiin baaritaanka STI iyo BBV?

Waxaad kala hadashid dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada waxaa laga dhigi doona mid qarsoon. Waxaad waydiisan kartaa doorashadaada ah dhakhtar ama kalkaaliso nin ah ama dumar ah.

Dhakhtarka ama kalkaalisada waxaa laga yabaa inay ku weydiiyaan waxoogaa su'aalo ah si ay u ogaadaan waxay baarayaan  iyo inta jeer ee lagu baarayo. Su'aalaha waxaa laga yaabaa inay ka mid yihiin:

- Intee wehel galmo ayaad leedahay?
- Miyaad isticmaashaa ka hortagayaal sida kondomiska?
- Weheladaada galmadu ma rag baa, mise dumar, labadaba ama kuwo kale?
- Waa goorma markii kuugu danbeysay ee galmo sameyso?
- Waa maxay sidaad u galmootid?

Ka dib dhakhtarka ayaa kuu sharxi doona baaritaanada aad u baahan doonto.

MULTICULTURAL CENTRE FOR WOMEN'S HEALTH

Sexual Health Victoria

Care
Education
Advocacy

# Baaritaanka Infekshinada Galmada laysugu gudbiyo (STIs) iyo Fayraska Dhiigga Ku dhasha (BBV) :

*waxaad fileyso*


## Baaritaanka STI waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo:




*Saami kaadi (kaadi)*



*Saamiga dhiigga*



*Saamiga marinta*



*Baaritaan jireed haddii aad leedahay wax astaamo ah.*

Waxaa laga yaabaa inaad dharka iska bixiso laga bilaabo miskaha ilaa hoos meel gaar ah oo ku taal qolka wareysiga bukaanka. Dhakhaatiirtu waa aqoon yahano oo aad u xushmeyn doona arimahaaga gaarka ah.

## Baaritaanka BBV waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo:



*Saami dhiig*

Saamiyada la qaaday waxaa la yiraahdaa baaritaanada saami qaadista waxaana loo diri doona shaybaarka si looga jeegareeyo STIs ama BBVs. Waxay qaadaneysaa ilaa hal toddobaad najiiyooyinku inay ku soo noqdaan rugta caafimaadka. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato ballan kale oo dhakhtarka ama kalkaalisada ah si looga wada hadlo natiijooyinka baaritaanka.

# Baaritaanka Infekshinada Galmada laysugu gudbiyo (STIs) iyo Fayraska Dhiigga Ku dhasha (BBV) : *waxaad fileyso*

## Waa intee kharashka baaritaanka STI iyo BBV?

Haddii aad heysato kaarka Medicare ka, baaritaanada saami qaadista waxaa laga yaabaa in dawlada lagu dalaco.

Tan micnaheedu waxaa weeye waxaa daboolaysa Dawlada adiguna baaritaanada lacag kama bixineysid.

Kharashka ballanta rugta caafimaadka way ka duwanaan doontaa iyadoo ku xiran meeshaad tagto:

- Rugaha caafimaadka qaarkood ballantaada waxay ku dalacayaan dawlada haddii aad heysato kaarka Medicare ka iyo/ama Kaarka Daryeelka Caafimaadka.
- Rugaha caafimaadku waxay ku weydiin doonaan inaad bixisid lacagta ujrada ee u dhaxeysa inta dawladu kaa bixineyso. Tan micnaheedu waxaa weeye inaad bixin doontid waxoogaa ka mid ah kharashaadkaaga ballanta.
- Haddii aadan heysan kaarka Medicare ka , waxay u muuqataa inaad bixin doonto kharashka ballanta oo dhan.

Waxaad soo wici kartaa rugta caafimaadka oo aad weydiin kartaa wax ku saabsan kharashka ballanta ka hor intaadan tegin.

Haddii aad u baahan tahay daawo ama daaweyn, waxaa laga yaabaa inay jirto kharashka rugta caafimaadka ama farmasiga.

## Waxaad  ili doonto haddii aad tagto rugta caa imaadka ee Sexual Health Victoria.

Sexual Health Victoria waxay siisaa baaritaanka STI iyo BBV oo khibrad leh oo qarsoon dadka reer Victoria. Waxaan sidoo kale bixinaa tallo khabiirnimo ah iyo daryeel ku saabsan arimaha caafimaadka galmada iyo dhalmada.

# Baaritaanka Infekshinada Galmada laysugu gudbiyo (STIs) iyo Fayraska Dhiigga Ku dhasha (BBV) : *waxaad fileyso*

Haddii aad imaneysid rugteena caafimaadka:

- **Tallaabada 1:** Waxaad sameysan kartaa ballan adoo soo wacaya 03 92570100 rugteena caafimaadka ee BOX HILL ama 03 9660 4700 rugteena caafimaadka ee Melbourne ama eeg website keena wixii ah ku ballansiga interneetka iyo 'ka soo dul dhac' xaq u yeelashada iyo wakhtiyadaba.
- **Tallaabada 2:** Haddii kani yahay booqashadaadii ugu horeysay rugteena caafimaadka,  waxaa lagu weydiin doona inaad buuxiso foomka isdiiwaangelinta. Haddii aad caawimaad uga baahan tahay buuxinta foomka, shaqaalaha soo dhaweynta ayaa ku caawin doona.
- **Tallaabada 3:** Waxaad la hadli doontaa dhakhtar ama kalkaaliso oo ku weydiin doonta su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga guud, ka galmada iyo dhalmadaba. Waxaad nagala hadashaa wuxuu ka dhici doona qol gaar ah waxaana loo heyn doona si qarsoon.
- **Tallaabada 4:** Dhakhtarka ama kalkaalisada ayaa sharxi doona wixii baaritaano ah ee lagu talinayo.
- **Tallaabada 5:** Waxaad go'aansan kartaa baaritaanada lagu taliyey keed jeleclaan lahayd iyo kaad awoodid inaad badanaa soo qaado saamigaaga.
- **Tallaabada 6:** Waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad sameysato ballan kale taariikh dambe si looga wada hadlo natiijooyinka.

## Wixii macluumaad dheeraad ah:

- La xiriir dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada
- La xiriir Sexual Health Victoria's clinic
- Booqo website ka Qorsheynta Qoyska ee Victoria wax ku saabsan kharashaadka iyo su'aalaha badanaa lays weydiiyo rugteena caafimaadka.
- Akhri wax ku saabsan 'Waa maxay STIs iyo BBVs?'

## Waxaa sidoo kale laga yaabaa inaad xiiseyso daawashada:

Guji xiriirkan si aad u daawatid fiidyowga ku saabsan dadka dhalinyarada ah ee isticmaalaya adeegyada caafimaadka galmada.

*Qoraalka: Macluumaadkan waxaa la soo saaray iyadoo lala tashanayo oo ay ogolaadeen: Xarunta Dhaqamada badan ee loogu talagalay Caafimaadka Dumarka. Afeef: Warqadaan xaqiiqda waxay bixineysaa macluumaad guud oo kaliya. Ku haboonaanta macluumaadkan guud qofba qofka kale wuu ka duwan yahay, iyadoo ku xiran xaaladaha shakhsiyadeed. Waa inaad doonayaa tallo sharci ama caafimaad oo khaas ah oo ku saabsan xaaladahaaga shakhsiyadeed. Xuquuqda xafidan© Xuquuqda xafidan ee macluumaadka ku jira warqadan xaqiiqda waxaa iska leh Qorsheynta Qoyska ee Victoria (ama, xaaladaha qaarkood, cid saddexaad) wuxuuna hoos imanayaa Heerka Xuquuqda xafidan ee 1968. Waxaanu kuu ogolaanay inaad badiso ama aad kula xiriirto macluumaadkeenan xuquuqda xafidan haddii aad tahay urur waxbarasho oo aan faa'iido doon ahayn, ujeedaduna tahay siinta macluumaadka ardeydaada iyadoo ku xiran inaad ku darto wixii afeef ah ee la xiriira macluumaadkan. Wixii dib u soo saarid kale ah ama xiriirka macluumaadkeena wuxuu u baahan doona ka raali ahaanshahayaga hore, adoo isticmaalaya foomkeena ka raali ahaanshaha oo aad buuxin karto dirina karto.*